

Isnadaamis

Waalidka ama masuulka qaaliga ahow,

Waxa lagu siinayaa xaashidan xaqiiqda:

- Sababtoo ah adiga ama ilmahaaga waxaa laga yaabaa inaad la kulantay molluscum contagiosum.**
 - Ujeeddooyin macluumaaad oo keliya.**
-

Macluumaaadka Guud oo ku saabsan Isnadaamis

Waa maxay Isnadaamis?

- Isnadaamis waxaa keena fayraska loo yaqaan (poxvirus) kaas oo ku dhaca lakabka sare ee maqaarka.
- Waa caabuq maqaarka caadiga ah kaasoo sababa nabarro wareeg ah oo aan xanuun lahayn maqaarka.
- Qofka qaba isnadaamis waxay u badan tahay inuu ku fido meelaha kale ee jirkiisa marka loo eego qof kale.

Ya qaadi kara?

- Qof kasta wuu qaadi kara molluscum isnadaamis.
- Waxay ku badan tahay carruurta 1 ilaa 10 sano jir ah.

Waa maxay calaamaduhu?

- Astaanta ugu weyn waa korriinka nabarrada yaryar ee maqaarka. Kuuskuusku badanaa waa midab-jidh, caddaan, jaalle, ama cad, oo dhexda ku leh god.
- Carruurto waxay caadi ahaan ku yeeshan kuuskuus vejiga, dhabarka, laabta, gacmaha, iyo lugaha.
- Dadka qaangaarka ah waxay inta badan ku yeeshaan kuuskuuska caloosha hoose, xubnaha taranka, iyo bowdada gudaha.
- Kuuskuusku caadi ahaan xanuun ma laha, laakiin mararka qaarkood way cuncuni karaan oo bararaan.
- Kuuskuusku wuxu sii jiri karaa 2 ilaa 3 bilood.

Sidee buu u faafaa?

- Fayrasku waxa laga helaa kuuskuuska maqaarka.
 - Marka nabarrada la xoqo, fayrasku waxa uu ku fidi karaa meelaha kale ee jidhka, taas oo sababta nabarro badan oo soo baxa.
 - Qofku wuxuu u gudbin karaa qof kale haddii uu taabto nabarrada maqaarkiisa oo uusan gacmaha dhaqin, ka dibna taabto qof kale maqaarkiis.
 - Waxa kale oo lagu faafin karaa in la wadaago alaabta gaarka ah, sida dharka labbiska, shukumaan, iyo bustayaasha.
-

Sideen ku ogaan karaa in ilmahaygu qabo isnadaamis?

Bixiyaha daryeelka caafimaadku wuxuu baari karaa isnadaamis isagoo eegaya nabarrada maqaarka qofka. Mararka qaarkood waxay ka qaadaan muunad kuuskuuska oo ay ku eegaan mikroskoob.

Haddii aad qabto su'aalo dheeraad ah ama aad ka welwesan tahay in ilmahaagu qabo isnadaamis, la xiriir bixiyaha xanaanada caafimaadkaaga. Xaashidan xaqiiqadu waxay ku siinaysaa macluumaad guud oo keliya.

Maxaa dhacaya haddii ilmahaygu qabo Isnadaamis?

Isla markiiba ogeysii bixiyaha xanaanada cunugga ama dugsiga barbaarinta haddii ilmahaagu qabo Isnadaamis.

Sidee loola daaweyya?

- Kuuskuusku caadi ahaan iskood ayay u baxaan iyaga oo aan nabaro lahayn. Dhammaan kuuskuusku guud ahaan waxay ku baaba'aan qiyaastii 6 ilaa 18 bilood gudahood, laakiin waxay qaadan kartaa ilaa 4 sano.
- Carruurta leh barar kala firirsan, ama hal barar, uma baahna in la daweeyo.
- Kala hadal dhakhtarkaaga wixii ku saabsan doorashooyinka daawaynta.

Sideen uga hortagi karaa in Isnadaamis uu fido?

- Ka fogow taabashada maqaar-ka-maqaarka ee shakhsiyadka qaba fayraska.
- Iska ilaali inaad la wadaagto alaabta gaarka ah sida shukumaanka, dharka, iyo saabuunta.
- Dhaq gacmaha marar badan, gaar ahaan ka dib markaad taabato kuuskuuska.
- Ka fogow inaad xoqdo ama aad ka soo qaadatid kuuskuuska, maadaama ay tani ku faafiso kuuskuusyada meelaha kale ee jidhka.
- Kuuskuusku ha ahaadaan mid nadiifa, engegaan, oo ku dabool dhar ama faashad mar kasta oo ay suurtogal tahay.

Ilmahaygu ma u baahan yahay inuu guriga ka joogo daryeelka ilmaha?

Maya. Carruurta la kulmay, ama laga helay, isnadaamis waxay sii wadi karaan inay tagaan daryeelka ilmaha.

Fadlan raac nidaamka jirada ee barnaamijka xanaanada cunuggaaga.

Tixraacyo:

American Academy of Pediatrics

- *Caring for our Children, Chapter 3 Health Promotion and Protection, 3.6 Management of Illness, 3.6.1 Inclusion/Exclusion Due to Illness*
- *Caring for our Children, Chapter 7 Infectious Diseases, 7.5 Skin and Mucous Membrane Infections, 7.5.7 Molluscum Contagiosum*
- *Managing Infectious Diseases in Child Care and Schools, 5th Edition. Page 127*

Centers of Disease Control & Prevention

- *Molluscum Contagiosum website <https://statics.teams.cdn.office.net/evergreen-assets/safelinks/1/atp-safelinks.html>*

Child Care Health Program – Public Health Seattle & King County

- *<https://kingcounty.gov/depts/health/child-teen-health/child-care-health/disease-prevention.aspx>. Disease Prevention Website*